

XUQUQDAADA HOOS TIMAADA MADI-CAL

Haddii aad ogaysiiskan iyo/ama dukumeentiyo kale ugu baahan tahay Qorshaha iyagoo ah qaab isgaarsiineed oo nooc kale ah sida far waaweyn, farta indhoolayaasha, ama qaab elektaroonig ah, ama, haddii aad rabto in lagaa caawiyo akhrinta qoraalka, fadlan la xiriir Khadka Helitaanka iyo Dhibaataada (ACL) adigoo wacaya 1-888-724-7240.

HADDII AAD KU GANACSANAYN GO'AANKA LAGA GAARAY DAAWEYNTA CAAFIMAADKAAGA MASKAXDA AMA DAAWEYNTA DHIBAATADAADA ISTICMAALKA MUKHUDARAADKA, WAXAAD GUDBIN KARTAA RACFAAN. RACFAANKAAN WAXAA LOO GUDBINAYAA QORSHAHAAGA DAAWEYNTA.

SIDA LOO GUDBIYO RACFAAN

Waxaad haysataa **60 maalmood** laga bilaabo taariikhda warqaddan "Ogaysiiska Go'aaminta Gunnooyinka Xaaladaha Daran" si aad u gudbiso rafcaan. **Haddii aad hadda hesho daaweyn oo aad rabto in aad sii waddo helitaanka daaweynta, waa in aad racfaan ku codsataa 10 maalmood** gudahooda laga bilaabo taariikhda warqaddan, AMA ka hor taariikhda qorshahaaga uu sheegay in adeegyada la joojin doono. Waa in aad sheegtaa in aad doonayso in aad sii wadato helitaanka daawaynta marka aad gudbinayso racfaanka.

Waxaad racfaanka ku gudbin kartaa telefoon ama qoraal. Haddii aad rafcaanka ku gudbiso taleefoon, waa inaad raacisaa rafcaan qoran oo saxeexan. Qorshuhu wuxuu ku siin doonaa caawimaad lacag la'aan ah haddii aad u baahan tahay caawimaad.

Taleefa ahaan: La xiriir mid ka mid ah wakaaladaha u-dooditaanka dadka ee hoose. Haddii ay dhibaato kaa haysato maqalka ama hadalka, fadlan wac 711.

<p>Wixii la xiriira adeegyada BUKAAN-SOOCODKA, wac Xarunta Macmiilka ee Barashada Caafimaadka iyo U doodista (CCHEA)</p> <p>1-877-734-3258 9:00 a.m. ilaa 5:00 p.m.</p>	<p>Wixii la xiriira adeegyada BUKAAN-JIIFKA ama DEGANAANSHAHA, wac Barnaamijka U doodista Bukaanka JFS</p> <p>619-282-1134 ama 1-800-479-2233 8:00 a.m. ilaa 5:00 p.m.</p>
--	---

QORAAL AHAAN: Buuxi foomka racfaanka ama warqad u qor qorshahaaga una dir:

<p>Wixii la xiriira adeegyada BUKAAN-SOOCODKA,</p> <p>Xarunta Macmiilka ee barashada Caafimaadka iyo U doodista (CCHEA)</p>	<p>Wixii la xiriira adeegyada BUKAAN-JIIFKA ama DEGANAANSHAHA,</p> <p>Barnaamijka U doodista Bukaanka JFS 8804 Balboa Avenue</p>
--	---

Xaquuqdaada Hoos Timaada Medi-Cal - Racfaan

Degmada San Diego BHS (Qorshaha) Dib u eegis. 09/03/21

XUQUUQDAADA HOOS TIMAADA MADI-CAL

1764 San Diego Avenue, Suite 200 San Diego, CA 92110	San Diego, CA 92123
---	---------------------

Adeeg-bixiyahaaga ayaa kuu heli doona foomamka racfaanka. Wakaaladaha kor ku xusan ayaa sidoo kale kuu soo diri karaan foom.

Waxaad adiga naftaada gudbisan kartaa racfaan. Ama, waxaad heli kartaa qof sida qaraabo, saaxiib, u doode, adeeg-bixiye, ama qareen inuu kuu gudbiyo racfaanka. Qofkaas waxaa loo yaqaanaa "wakiil idman." Waxaad soo diri kartaa nooc kasta oo macluumaad ah oo aad rabto in Qorshahaagu dib u eegis ku sameeyo. Racfaankaaga waxaa dib u eegis ku samayn doona adeeg-bixiye ka duwan qofka qaatay go'aanka koowaad.

Qorshahaagu wuxuu haystaa 30 maalmood si uu kuu siiyo jawaab. Waqtigaas, waxaad heli doontaa warqadda "Ogeysiiska Xallinta Racfaanka". Warqadan ayaa kuu sheegi doonta waxa uu Qorshuhu go'aamiyay. **Haddii aadan helin warqadda ku qoran go'aanka Qorshaha 30 maalmood gudahood, waxaad codsan kartaa "Dhegeysi Goboleed" oo garsooraha ayaa dib u eegis ku samayn doona kiiskaaga.** Fadlan ka akhri qaybta hoose si aad u hesho tilmaamo ku saabsan sida loo codsado Dhegeysiga Gobolka.

RACFAANADA LA DEDEJIYEY

Haddii aad u malaynayso in sugitaanka 30 maalmood ay dhaawacayso caafimaadkaaga, waxaa laga yaabaa inaad awood u yeelato inaad jawaab ku hesho 72 saacadood gudahood. Markaad gudbinayso rafcaankaaga, sheeg sababta sugitaanka ay u dhaawacayso caafimaadkaaga. Xaquuhu inaad codsato "**rafcaanka la dedejiyo.**"

DHAGAYSIGA GOBOLKA

Haddii aad gudbisay rafcaan oo aad heshay warqadda "Ogeysiiska Xallinta Racfaanka" oo kuu sheegaysa in Qorshahaagu aanu wali bixin doonin adeegyada, **ama aadanba waligaa helin warqad kuu sheegaysa go'aanka isla markaana la dhaafay muddo 30 maalmood ah,** waxaad codsan kartaa "Dhageysiga Gobolka" oo garsooraha ayaa dib u eegis ku samayn doona kiiskaaga. Khasab ma ahan inaad bixiso kharashka Dhageysiga Gobolka.

Waa inaad Dhageysiga Gobolka ku codsataa **120 maalmood** gudahooda laga bilaabo taariikhda warqada "Ogeysiiska Xallinta Racfaanka". Dhageysiga Gobolka waxaad ku codsan kartaa taleefan, elektaroonig ahaan, ama qoraal ahaan:

- **Taleefa ahaan:** Wac **1-800-952-5253**. Haddii aadan si fiican u hadlin ama aadan wax u maqli karin, fadlan wac **TTY/TDD 1-800-952-8349**.

Elektaroonig ahaan: Waxaad khadka tooska ah ka codsan kartaa Dhageysiga Gobolka. Fadlan booqo websaydka Waaxda Adeegyada Bulshada ee California' si aad u buuxiso

Xaquuqdaada Hoos Timaada Medi-Cal - Racfaan

Degmada San Diego BHS (Qorshaha) Dib u eegis. 09/03/21

XUQUQDAADA HOOS TIMAADA MADI-CAL

foomka eletroonigga ah:

<https://acms.dss.ca.gov/acms/page.request.do?page=public.intakeForm>

- Qoraal ahaan: Buuxi foomka Dhageysiga Gobolka ama warqad u dir:

Waaxda Adeegyada Bulshada ee California

Qeybta Dhageysiga Gobolka

P.O. Box 944243, Mail Station 9-17-37

Sacramento, CA 94244-2430

Xaqiiji inaad ku qorto magacaaga, cinwaankaga, lambarka taleefankaaga, Taariikhda Dhalashada, iyo sababta aad u rabto Dhagaysi Goboleed. Haddii qof uu ku caawinayo codsashada Dhageysiga Gobolka, foomka ama warqadda ku dar magacooda, cinwaankooda, iyo lambarka taleefanooda. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Khasab ma ahan inaad bixiso kharashka Turjumaanka. Waxaanu kuu raadin doonaa mid.

Kadib markaad codsato Dhagaysiga Gobolka, waxay qaadan kartaa ilaa 90 maalmood in go'aan laga gaaro kiiskaaga oo lagu soo diro jawaab. Haddii aad u malaynayso in sugitaanka muddadaas dheer ay waxyeellaynayso caafimaadkaaga, waxaa laga yaabaa inaad awood u yeelato inaad jawaab ku hesho 3 saacadood gudahood. Waxaad u baahan kartaa inaad weydiisato dhakhtarkaaga ama Qorshahaaga inay warqad kuu qoraan ama adiga ayaa qoran kara. Warqaddu waa inay si faahfaahsan u sharraxdo sida sugitaanka ilaa 90 maalmood ee go'aan ka gaarista kiiskaaga ay si dhab ah u dhaawacayso nolashaada, caafimaadkaaga, ama awooddaada ah inaad gaarto, ilaaliso, ama dib u hesho awood shaqeedka ugu badan. Kadib, codso "**dhageysi la dedejiyey**," oo keen warqadda aad ku codsanayso dhageysiga.

Wakiil Idman

Adiga ayaa naftaada u hadli kara xilliga Dhagaysiga Gobolka. Ama, qof sida qaraabo, saaxiib, u doode, adeeg-bixiye, ama qareen ayaa kuu hadli kara. Haddii aad rabto in qof kale uu kuu hadlo, markaas waa inaad u sheegtaa xafiiska Dhageysiga Gobolka in qofkaas loo oggol yahay inuu kuu hadlo. Qofkaas waxaa loo yaqaanaa "wakiil idman."

Caawinaad Sharciyeed

Waxa laga yaabaa inaad hesho caawinaad sharciyeed oo lacag la'aan ah. Waxaad sidoo kale barnaamijka caawimaadda sharciyeed ee degmadaada ka wici kartaa 1-877-734-3258.

Xaquuqdaada Hoos Timaada Medi-Cal - Racfaan

Degmada San Diego BHS (Qorshaha) Dib u eegis. 09/03/21